KU DHAQAN XAFIIS D.

# Faafin Rasmi ah

EE JAMHURIYADDA DIMUQRADIGA SOMALIYA

Sannadka 2aad | Muqdisho, 21 Oktoobar 1974 | L. 2 R. L. 10

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Samaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinaya Xafiiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 35. Tr. 20 Sebtember 1974 — **Cashuurta Wakaaladaha,** *Bankiyada iyo Wershadaha Dawladda.* Bog. 470

SHARCI L. 36, Tr. 22 Sebtember 1974 — *Imtixaanada oo lagu qaadi doono far Soomaali.* » 471

SHARCI L. 37, Tr. 1 Oktoobar 1974 — *Oggolaansho Heshiis lagu dhisayo wershad lagu safeeyo betroolka oo ka dhexeysa Soomaaliya iyo Ciraaq.* » 472

SHARCI L. 37, Tr. 1 Oktoobar 1974 — *Oggolaansho Heshiis lagu dhisayo wershad lagu safeeyo betrolka oo ka dhexeysa Soomaaliya iyo Ciraaq Af Carabi.* » 473

SHARCI L. 38, Tr. 1 Oktoobar 1974 — *Gadashada iyo dhoofinta Kalluunka.* » 474

# BOGGA LABAAD


XEER MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA, Tr. 19 Sebtember 1974, L. 107 — *Isbeddelkii labaad ee Miisaaniyadda 1974.* Bog. 476

XEER WASAARADDA HIDDAHA IYO TACLIINTA SARE, Tr. 8 Agoosto 1974, L. 108 — *Magacaabid xubnaha Guddiga Af Soomaaliga.* » 478

XEER WASAARADDA CADAALADDA IYO DIINTA, Tr. 25 Agoosto 1974, L. 109 — *Magacaabid Guddi soo habaysa sharciyadda Nootayaalka.* » 480

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 27 Agoosto 1974, L. 110 — *Dhul gatay Jaalle Maxamed Abyan Cigaal, ku fadhiya mq. 325, kuna yaal Muqdisho, waddada Maka al Mukarama, Xaafadda Hawl-Wadaag. Dhul la sii yey Jaalle Cali Warsame Hilowle mq. 195, kuna yaal Muqdisho, Xaafadda Hawl-Wadaag.* » 481

XEER WASAARADDA BEERAHA, Tr. 9 Sebtember 1974, L. 11 — *Beero lala wareegay.* Bog. 482

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 23 Agoosto 1962, L, 112 — *Concessione di area di terreno demaniale a favore del Sig. Mohamud Mohamed Addo.* » 484

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 23 Agoosto 1962, L. 113 — *Concessione di area di terreno demaniale a favore del Sig. Hussein Giumale Ghedi.* » 485

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Tr. 23 Agoosto 1962, L. 114 — *Concessione di area di terreno demaniale a favore del Sig. Gibril Ali Gassim.* » 486


---

# BOGGA SEDEXAAD

## TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS, IYO WIXII LA MID AH


WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Caydiid Ismaaciili Cali. (211)* Bog. 488

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Ibraahim Cabdow Seef. (212)* » 488

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Maka Xasan Mahamed. (213)* » 489

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Axmed Sheekh Isaaq Cigaal. (214)* Bog. 489

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Nuur Maxamed Cali. (215)* » 490

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Wshadda Marmarka. (216)* » 490

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Maxamed Nuur Guutaale. (217)* » 491

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Faaduma Maxamed Cumar iyo Muxiddin Hilowle. (218)* » 491

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Warsame Aadan. (219)* » 492

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Cali Ciise Faarax. (220)* » 492

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Jaamac Muuse Samater. (221)* » 493

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Cabdisalaam Xaaji Saxardiid. (222)* » 494

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Muuhye Aadan Jaamac. (223)* » 494

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Cumar Xaaji Maxamed Bood. (224)* » 495

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Cali Suubiye Maxamed. (225)* » 495

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Cabdullaahi Diini. (226)* » 496

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Cabdi Diini. (227)* » 496

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Caasha Aadan Cali. (228)* » 497

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, Ogeysiis, Naada Dhul *Jaalle Abshir Warsame Xasan iyo Cali Cabdulqaadir. (229)* » 497

MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE, Lumid jeeg L. 1731 — *Shire Muuse Maxamed. (229 Bis)* » 498

**SHARCI L. 35,Tr. 20 Sebtembre 1974.**
**Sharciga Cashuurista Wakaaladaha, Bankiyada iyo Warshaddaha Dawladda.**

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii koobaad iyo tii labaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar, 1960;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

1. Dhaammaan Wakaaladaha, Bankiyada iyo Warshadaha Dawladda, ka bilaabata Sannadka Cashuurta 1974, waxa ku waajiba Cashuurta Toosan iyo tan Dadban.

2. Wakaaladaha, Bankiyada iyo Warshadaha aan soo sheegnay Cashuurihii looga daayay si sharci ahaan ah hirgalka shercigan ka hor lagama dalbi karo.

Qodobka 2aad

Sharcigani waxba u dhimi maayo:

i) Cashuur ka dhaafidda ku qoran qodobka 17aad ee Sharciga Cashuurta Toosan Tir. 5 ee 1966, iyo Sharciga Lr. 26 ee 10 Nofembre 1961;

ii) Cashuur ka dhaafidda ku saabsan heshiisyada ay Dawladdu la gashay ama la geli doonto dad ama Dawlado Shisheeye.

Qodobka 3aad

Sharci ama Xeer kasta ee Wakaaladaha, Bankiyada iyo Washedaha ee u ogolaanaayey Cashuur ka dhaafid waa la baabi'yey.

Qodobka 4aad

Sharcigaan wuxuu dhaqangelayaa marka uu Saxeexo Madaxweynaha Golaha Sare ee Kacaanka, wuxuuna ku soo bixi doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 20 Sebtembre 1974.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

**SHARCI L. 36, Tr. 22 Sebtembre 1974.**
**Imitixaanada oo lagu qaadi doono Far Soomaali.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii koowaad iyo tii labaad ee Kacaankii 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga lamb. yahay 14 ee saa baxay taariikhdu markey aheyd 15-1-1973;

ISAGOO AQOONSADAY Si Af Soomaaligu uu ku faafo in loo sameeyo sharci khuseeya arrintaas;

ISAGOO ARKAY Go' aankii labada gole ee soo baxay bishu markey aheyd 25-7-1974;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Imtixaan kasta oo la qaadayo waa in lagu qaado far Soomaali, haddii laga reebo mooyee Ciidamada Qalabka sida ee Xoogga Dalka Soomaaliya.

Qodobka 2aad

In haddii dad ajnabi ah ay shardi kaga dhigaan ninka ay qoranay aan inuu afkooda yaqaan waa loo oggol yahay, in imtixaan kaga qaadi karaan.

Qodobka 3aad

Sharci kasta oo ka hor imaanaya midkan ama aan la socon karinba waa la baabi'iyey.

Qodobka 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa durba, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 22 Sebtebre 1974.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

**SHARCI L. 37, Tr. 1 Oktoobar 1974.**

**Oggolaansho hashiis lagu dhisaayo daluka J. D. S. warshad batroulka sifeyso oo ka dhexaysa Soimaaliya iyo Ciraaq.**

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

MARKUU ARKAY Xaashida 1aad tan labaad ee Kacaanka iyo Sharciga 1aad ee 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY Heshiiska dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Jamhuuriyadda Ciraaq ee la saxiixay 20-4-1974;

MARKUU ARKAY Baahida loo qabo Iskaashi xagga dhaqaalaha ee dhexmaro labada Dal gaar ahaanna horumarinta Sancadda ee labada Dal;

ISAGOO TIXGELINAAYA Go'aankii ka soo baxay G. S. K. iyo Xoghayayaasha lamb. ahaa XGX-15-62-74 ee 2dii Maajo 1974;

WUXUU SOO SAARAYA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa la oggolaaday Heshiiska la kala saxiixday 20-4-74, kuna saabsanaa dhismaha Warshadda Batroolka sifeysa ee Soomaaliya iyo Ciraaq.

Heshiisku wuxuu yeelanayya astaan Sharci wuxuuna ka mid noqonaya Sharciyada u yaal Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa 2 maajo 1974; waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 1 Oktoobar 1974.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

## جمهورية الصومال الديمقراطيـــة

قانون رقم ٣٧ الصادر فى اكتوبر ١٩٧٤
تصديق اتفاقية انشاء مصفى مشترك
فى جمهورية الصومال الديمقراطية

## رئيس المجلس الاعلى للثورة

بعد الاطلاع : على ميثاق الاول والثانى لثورة ٢١ اكتوبر سنة ١٩٦٩م .
وعلى القانون رقم ٣٧ الصادر ٢١ اكتوبر سنة ١٠٦٠م .

ونظـــرا : فى تنسيق أوجه القانون فى مختلف الميادين وخاصة فى حقل الصناعـــة وتطويرها فى كلا البلدين

ونظـــرا : لقرار مجلس قيادة الثورة والسكرتيريين رقم م. م. س. ٧٤/٦٢/١٥ فى تاريخ ٢ مايو ١٩٧٤

**يصـــــــــدر**

**القانون التالى : ـــ**

مـــادة ١

لقد تم التصديق على اتفاقية انشاء مصفى مشترك فى جمهوريـــــة الصومال الديمقراطية بين الجمهورية الديمقراطية الصومالية وجمهوريـــة العراق التى أبرمت بين حكومة الصومالية والعراقية فىتاريخ ١٩٧٤/٤/٢٠م ببغداد ويكون لها صفة شرعية ، معتبرة جزءا من قوانين الجمهوريـــــة الديمقراطية الصومالية .

مـــادة ٢

يسرى مفعول سريان هذا القانون ابتداءا من تاريخ ١٩٧٤/٥/٤ م وينشر فى الجريدة الرسمية .

**اللواء محمد سياد برى**
**رئيس المجلس الاعلى للثورة**

SHARCI L. 38, Tr. 1 Oètoobar 1974.
Sharci ku saabsan Gadashada iyo Dhoofinta Kalluunka.

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Sharciga Iskaashatooyinka ee lamb. yahay 40 soona baxay 4-10-1973;

ISAGOO AQOONSAN Inay tahay lagama maarmaan in la soo saaro Sharci ku saabsan gadashada iyo dhoofinta Kalluunka;

ISAGOO TIXGELINAYA Taladii — soo jeediyey Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Kalluunka iyo Gaadiidka Badda;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYA

Sharciga hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

*Waajibka saaran Kalluumaysatada*

Kalluumaysato kasta waxa ku waajib ah inay iibiso Kalluunka ay soo dabto, Iskaashatada Kalluunka ee xadkeeda Kallunka laga ugaarsaday.

Qodobka 2aad

*Waajibka saaran Iskaashatooyinka*

Iskaashatooyinka Kalluunka waxa ku waajio ah inay ka gataan Kalluumaysatada wixii Kalluun ah oo qiimagal ah oo xadkeeda laga qabtay.

Qodobka 3aad

*Ruqsad Dhoofinta Kalluunka*

Shirkadaha Kalluunmaysiga iyo Iskaashatooyinka Kalluunka mooyaane qofna xaq uma leh inuu Kalluun ka dhoofiyo Degmo, ama Gobol oo — u saaro dibedda, haddii —san ruqsad ka ahysan Wasaaradda Ganacsiga Dibedda taaso iyana ku xidhan oggolaasho (Nulla osta) marka hore laga helo Wasaaradda Kalluunka iyo Gaadiidka Badda

Qodobka 4aad

*Sicirka Kalluunka*

Wasaaradda Kallunka iyo Gaadiidka Badda ayaa gooynaysa Kalluunka iyadoo la kaashanaysa Wasaaradda Ganacsiga Gudaha iyo Guddiga Kacaanka ee Degmada.

Qodobka 5aad

*Shirkadaha Kalluumaysiga*

Shirkadaha Kalluumaysatada ah waxa loo oggolyaha inay si madax bannaan u dabtaan Kalluunka, dibeddana ugu dhoofsadaan. Haddiise ay rabaan Shirkadaha Kalluunku inay ku gadaan Kalluunkooda dalka gudihiisa, waxa khasab ku ah inay ka gadaan Iskaashatooyinka oo qudh ah.

Qodobka 6aad

Kalluunmaysatada, Shirkadaha Kalluunka iyo Iskaatooyinka, waa inay u dabtaan Kalluunka una xannaaneeyaan si habsami ah iyagoo la socconaya Sharciyada u degsan ugaarsiga iyo xannaanada iyo wareegtooyinka Wasaaradda Kalluunka iyo Gaadiidka Badda oo saamaynaysa xannaanada nafleeyda Badda ku jirta.

Qodobka 7aad

*Ciqaabta*

1. Ciddii ku xadgudubta sharcigan waxa lagu ciqaabaya xarig bil ilaa 6 bilood ah ama ganaax lacageed oo ah Sh. So. 500 ilaa Sh. So. 3000 ama labadaba.

2. Kalluunka la qabtana Dawladda la wareegaysa.

Qodobka 8aad

*Hirgelin*

1. Shrcigani wuxuu dhaqan geleya markuu Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda ku soo baxo.

2. Wixii Sharciyo hore ahaa oo ka horjeeda Sharciganna isagaa baabi'yay.

Muqdisho, 1 Oktoobar 1974.

*Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOOMIYAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

# BOGGA LABAAD

## XEER DOWLADEED

XEER MADAWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

Tr. 19 Sebtembre 1974, L. 107.
Isbeddelkii 2aad ee miisaaniyadda 1974.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Go'aankii Labada Gole ee 19-9-1974;

Qodobka 1aad

Isbeddelka lagu sameeyey Miisaaniyadda 1974, sida ka muuqata lifaaqa A, waa la oggolaaday.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa 19ka Sebtembre, 1974 wuxuuna ka mid noqon doonaa sharciyada Dawladda Soomaaliyeed; waa in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 19 Sebtember 1974.

*S. G. Maxamed Siyaad Barre*
GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA

*Jaalle M. Y. Werax*
Xoghayaha Wasaaradda Maaliyadda

*Lifaaq A*

## ISBEDDELKA LABAAD MIISAANIYADDA SANNADKA 1974

| M A D A X | | Madax-Xige | Tilmaan | Qiyaas hore | Isbeddelka | Qiyaasta cusub |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 10.1.0. | Amaahda | 10.1.1. | Amaahda gudaha | 17.182.387 | + 7.817.693 | 25.000.000 |
| 1.2.0. | Wasaaradda Maaliyadda | 1.2.8. (q) | Kaalmada kaydka ah | 3.500.000 | + 5.817.693 | 9.317.693 |
| 1.2.0. | Wasaaradda Maaliyadda | 2.2.0. (a) | Deeqda Joogtada ah | 7.421.024 | + 2.000.000 | 9.421.024 |

**XEER WASAARADDA HIDDAHA IYO TACLINTA**

Tr. 8 Agoosto 1974, L. 108.
Magacffbidda Xubnaha Guddiga Af Soomaaliga.

WASAARADDA HIDDAHA IYO TACLINTA SARE

ISAGOO ARKAY Xaashidii koowaad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Xaashidii labaad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Xeerka Guddiga Af Soomaaliga ee 16kii Febraayo, 1974;

TIXGELINAYA Baahida loo qabo magacaabidda Xubnaha Guddiga Af Soomaaliga;

WUXUU XEERAYAA

Qodobka 1aad

Xubnaha Guddiga Af Soomaaliga waxay ka kooban yihiin dadka hoos ku magacaaban:

XUBINTA FULINTA:

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Yaasiin Cismaan Keenadiid | Guddoomiye |
| 2. | Maxamed Shire Maxamed | Xubin |
| 3. | Axmed Cartan Xange | Xubin |
| 4. | Yuusuf Xirsi Axmed | Xubin |
| 5. | Xuseen Sheekh Maxamed Kaddare | Xubin |
| 6. | Dahabo Faarax Xasan | Xubin |
| 7. | Shire Jaamac Axmed | Xubin |

XUBINTA LA TALIYEYAASHA:

1. Sheekh Caqiib Cabdullaahi Jaamac
2. Maxamed Xaaji Xuseen Sheekaxariir
3. Axmed Cabdullaahi Qaalib
4. Aw Jaamac Cumar Ciise
5. Yuusuf Meygaag Samantar
6. Cabdullaahi Ardeeyo
7. Iikar Baana Haddaad
8. Muuse Xaaji Ismaaciil Calaad
9. Xaaji Aadan Afqallooc
10. Yuusuf Xaaji Ciise Dadmacaanshe.

XUBINTA XEELDHEERAYAASHA:

1. Yuusuf Munyo Yuusuf
2. Cabdulqaadir Nuur Salaad
3. Maxamed Nuur Caalin
4. Cali Maxamed Nuur
5. Ibrahim Maygaag Samatar
6. Cabdiraxmaan Caydiid
7. Saalax Xaaji Faarax Diiriye
8. Rashiid Sheekh Cabdullaahi
9. Cabdullaahi Xaaji Maxamuud Insaniya
10. Shaafi Sheekh Cabdi
11. Maxamed Gaanni
12. Cabdulcasiis Sheekh Cali
13. Cabiraxmaan Nuur Xirsi
14. Saalax Cabduraxmaan
15. Cabdullaahi Axmed Karaani.

Qodobka 2aad

Jaalle Yaasiin Cismaan Keenadiid waxaa loo magacaabayaa Guddoomiyaha Guddiga Af Soomaaliga.

Qodobka 3aad

Jaallayaasha ka tirsan Guddiga Af Soomaaliga Waxay abaalgud yeelanayaan:

i) Lix kun oo shilin sannadkiiba, qof kasta oo ka tirsan Xubinta Fulinta ama Xubinta La Taliyeyaasha oo aan shaqaale Dawladeed ahyn, ama saddex kun oo shilin sannadkiiba haddii uu yahay shaqaale Dwaeedda.l Abaalgudka waxaa loo bixin karsaa bil bil, bishiiba laba iyo toban meelood meeshood (1/12).

ii) Kun iyo siddeed boqol oo shilin sannadkiiba, qof kasta oo ka tirsan Xubinta Xeeldheeyaasha, waxaana loo bixin karaa saddexdii biloodba afar meelood meeshood (1/4).

Qodobka 4aad

Xeerkani wuxuu u dhaqan gelayaa si degdeg ah.

Muqdisho, 8 Agoosto 1974.

XOGHAYAHA DAWLADDA
*Dr. Maxamed Aadan Sheekh*

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD

Tr. 27 Agoosto 1974, L. 110.

Dhul gatay Jaalle Maxamed Abyan Cigaal, ku fadhiya mq. 325, kuna yaal Muqdisho, waddada Maka al Mukarama - Xafadda Hawl-Wadag.

Dhul la siiyay Jaalle Cali Warsame Hilowle mq. 195, kuna yaal Muqdisho - Xafadda Hawl-Wadag.

## XOGHAYAHA WASAARADDA HAWLAHA GUUD

ANNAGOO ARAGNAY Warqaddii Koowaad iyo tiii labaad ee Kacaanka iyo Xerka lamb. yahay 1 ee soo baxay 21kii Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY Amar Xeer L. 144 taarikhdeeduna ahayd 23 Maajo 1961;

ANNAGOO ARAGNAY Arji u soo qortay Jaalle Cali Warsame Hilowle taarikhdeeduna ahayd 3 Juno 1961, uu ku weydiisanayay dhul dhismo Dawladdeed kuna yaal Muqdisho, waddada Maka al Mukarama, Xafadda Hawl-Wadag;

ANNAGOO ARAGNAY Naadadii dhulka a ee lagu dhejiyay Xafiiska ku shaqa lahaa, laguna daabacay hashida rasmiga ah ee Dawladda lamb.

ANNAGOO ARAGNAY Ogolansihii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsaneed naqshadda dhismaha labarkoodu yahay 2474 bishi 3 Agoosto 1966, soona gudubtay fadhigii 17°aad ee 13 Sebtember 1966;

ANNAGOO ARAGNAY Ogolonsihii gudiga farsamada dhismaha uu ku saabsaneed naqshadda dhismaha lamb. 2742 ee EBER, laguna badalay naqshadda lamb. 2474, soona gudubtay fadhigii 19°aad ee 25 Lulyo 1974;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadaha tiradeedu yihiin L. 71486 ee 26-7-66 iyo L. 35479 ee 19-12-1971, in Jaalle Cali Warsame Hilowle uu diibay Xafiiska Canshuufta Badban lacag tiradeedu tahay Sh. So. 1.040, oo ah qiimahii dhulka;

ANNAGOO ARAGNAY Xaashadda ku saabsan siismaha dhulka lambarkoodu yahay MW-3-23-997 taarikhdeeduna tahay 23 Dec. 1971 in ninka kor ku magacaaban la siiyay dhul ku fadhiya mq. 520, kuna yaal Muqdisho, waddada Maka al Mukarama Xafadda Hawl-Wadag;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda ku qoran qaynunka siismada dhulka iyo naqshadda oo tiilmameyso dhulka isaga ah;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda hobsinada dhulka ay qortay Xafiiska Farsamada dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud taarikhdeeduna ahayd 21-8-1974, wahay caddeynevsa in dhismaha iyo naqshalla

**XEER WASAARADDA CADDAALADDA IYO DINTA**

**Tr. 25 Agoosto 1974, L. 109.**
**Magacaabid Guddi soo habeeya sharciga Nootayaalka.**

XOGHAYAHA DAWLADDA

ISAGOO ARKAYXaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY Xeerka soo baxay 2-3-1962 L. 1, kuna saabsanaa xirfadda Nootayaalka (Ordinamento Notarile);

ISAGOO ARKAY Xeerka 11kii Maarso 1972, L. 19, oo ku saabsanaa baabi'inta xirfadda Nootayaalka Iskooda u shaqaysanayey;

ISAGOO TIXGELINAYA Baahida loo qabo in wax laga beddelo waxna lagu siyaadiyo Sharciga Nootayaalka si ula socoto shaqadoodu hababka is beddelaya;

WUXUU MAGACAABAY GUDDI

Qodobka 1aad

Waxaa la magacaabay guddi ka kooban Sagaal (9)nin, kuwaasoo loo xilsaaray habeeynta, wax ka beddelidda iyo wax ku daridda sharciga Nootayaalka si uu u ahaado mid daryeelaya danta guud. Guddigaas oo ka kooban Jaallayaasha hoos ku qoran:

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Dr. Maxamed Cali Xaamid - G. Max. Raf. Xamar | Guddoomiye |
| 2. | Dr. Muuse Xuseen Sadiiq - Madaxda Nootayaalka | Xoghaye |
| 3. | Dr. Marotta Gigli - Khabiir | Xubin |
| 4. | Dr. Xasan Warsame Cali - Nootayo | » |
| 5. | Dr. Xasan Dhinbil Warsame - X. Xeer Ilaaliya | » |
| 6. | Dr. Yaslam Cabdalle - Garyaqaanka Dawladda | » |
| 7. | Gar. Ismaaciil Jeyte Xaayow - W. G. Wasaaraddan | » |
| 8. | Dr. Manjid Sing - ka tirsan W. Sharcideji Wasaaraddan | » |
| 9. | Jaalle Muxyadiin Xasan Yabarow - W. Lacagta | » |

Qodobka 2aad

Dekreetadani waxay dhaqan gelaysaa markii la saxiixo lana diiwaan geliyo, waxayna ku soo bixi doontaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriayadda.

Muqdisho, 25 Agoosto 1974.

Xoghayaha Dawladda
Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Diinta
*Jaalle Dr. Cabdisalaam Sh. Xuseen*

lamb. 2742 ee 25-7-74 soona gudubtay fadhigii 19°aad oo gurigu inay iswafaqsanyihiin;

ANNAGOO ARAGNAY Warqadda soo qortay Xafiiska Dawladda Hoose L. 3256 taarikhdeeduna ahayd 8-8-1974 caddeyneyso dhismaha guriga oo waafaqsan naqshadda dhismaha;

ANNAGOO ARAGNAY Nuqulka L. 3595 Rep. taarikhdeeduna ahayd 15 Nofember 1972, oo lagu qoray buuga Canshuuraa Dadban L. 761 Atti Pubblici Vil. 20, oo lagu dhigay Notayaha Dr. Muuse Xusen Sadiq. oo ku saabsan kalagadasho dhul uu iibsaday Cali Warsame Hilowle oo ka gatay Maxamed Abyan Egaal, kuna yaal Muqdisho, xafadda Hawl-Wadag, dhulka la mid ah qm. 325;

ISAGOO AQOONSADAY in waajibatikiisi innu ka baxay iinka kor ku soo sheegnay; m

AMAR XEER

A) Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Abyan Cigal la siiyay una gatay dhulka la mid ah mq. 325, kuna yaal Muqdisho — waddada Maka al Mukarama — Xafadda Hawl-Wadag.

B) Wawaa la siiyay Jaalle Cali Warsame Hilowle dhul Dawladeed ee ku fadhiya mq. 195, kuna yaal Muqdisho — Waddada Maka al Mukarama — Xafadda Hawl-Wadag.

Muqdiscio, 27 Agoosto 1974.

Xoghayaha Wasaaradda Hawlaha Guud
*W. S. G. Sare Maxamed Sheekh Cismaan*

---

**XEER WASAARADDA BEERAAHA**

**Tr. 9 Sebtember 1974, L. 111.**
**Beero lala wareegay.**

XOGHAYAHA

DAWLADDA EE WASAARADDA BEERAHA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee ka soo baxday Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka 21kii Oktoobar, 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lambarkiisu yahay 4 ee 30kii Jennaayo, 1967 kuna saabsan lahaarshada dhulka beeraha;

ISAGOO TIXGELIYEY Werbixinta Guddiga loo xilsaarey in ay soo indhaindheeyeen xeelka ay ku sugan yihiin dhululka ku magacaaban (1)

Melo Arturo Az. No. 29, (2) Tassinari Luigi Az. No. 49, (3) Montagni Gioacchino Erede Az. No. 125, (4) Fassetti-Goli, Acersi Eredi Az. No. 62, (5) Brighina Ignazio Az. No. 69, (6) Musso Fedi Giacinta Az. No. 126 (7) Torcelli Rosalba Az. 67 e 71, (8) Angeleri e Lecisi Az. No. 79, ee ku qorneyd werbixinta Guddiga Lamb. 050° Qar. ee 29kii Agoosto, 1974.

DEKREETO

Art. 1aad

*Go'aan*

Waxaa la guddoonahay laga bilaaba taariikhda Xeerkan la saxdixo in dulka ku magacaaban Melo Arturo, Tassinari Luigi, Montagni Gioaccino Eredi, Fossati-Goli Acersi Eredi, Brighina Ignazio, Musso Fedi Giacinta, Torcelli Rosalba, iyo Angeleri ee Lecisi in ay wereegao Wasaaradda Beeraha, dhulkaasoo ku yaala Gobolka Shebeellaha Hoose.

Art. 2aad

*Wa ka cabasho*

Waxaa kaloo la guddoonshay in ay Wasaaradda Beeraha dhulkaas lala wereegey si deg deg ah u beerto waxna uga qabato hagaajintiisa;

Art. 3aad

*Dhaqn Gol.*

Xeerkan isla maanta ayuu dhaqan galayas, weena in lagu qoraa Faafinta Rasmiga ah (Bollettino Ufficiale) ee Waddarka.

Muqdisho, 9 Sebtember 1974.

Xoghayaha Dawladda EE Beeraha
*Dr. Cumar Saalax Axmed*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 88.*
*Mogadiscio, li 18 Settembre 1974.*
*Il Magistrato ai Conti:*
Ten. Col. ABDULLAHI WARSAME NUR.

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

Tr. 23 Agoosto 1962, L. 112.

**Concessione di area d iterreno demaniale a favore del Sig. Mihamud Mohamed Addò.**

## IL MINISTRO

VISTI gli articoli n. 77 e n. 83, secondo comma della Costituzione;

VISTO il D. A. 18 Maggio 1956, n. 78 di Rep.;

VISTO il D. A. 13 Settembre 1956, n. 99 di Rep.;

RITENUTO che, per effetto dell'Ordinanza n. 5 del 12 Aprile 1950, sono tuttora applicabili, le disposizioni disciplinanti le concessione edilizie contenute nell'Ordinamento Fondiario per l'Eritrea, approvato con r.d. 7 Febbraio 1926, n. 269, esteso alla Somalia con r. d. 17 Marzo 1938, n. 380;

VISTA la domanda in data 22-12-1959, presentata dal Sig. Mohamud Mohamed Addò, intesa ad ottenere in concessione a scopo edilizio un appezzamento di terreno demaniale sito in Mogadiscio, in Villaggio Anzilotti.

CONSIDERATO che l'avviso ad opponendum riguardante l'area di terreno richiesta è rimasto affisso a termini di legge all'albo del Municipio di Mogadiscio, ed è stato pubblicato sul Bollettino Ufficiale della Somalia Suppl. n. 2 al n. 6 del 20 Giugno 1960, senza opposizione da parte di terzi;

VISTO il progetto concernente la costruzione di un edificio in muratura cheè stato approvato a suo tempo dalla Commissione Edilizia Municipale di Mogadiscio nella sua 258° seduta del 20 Agosto 1960;

VISTA la Bolletto n. 1482 in data 15 Settembre 1960, dell'Ufficio Tasse sugli Affari attestante che il Sig. Mohamud Mohamed Addò ha pagato la somma di So. 72, quale prezzo di cessione dell'area di terreno richiesta in concessione a scopo edilizio;

CONSIDERATO che l'area di terreno richiesta è di mq. 144, è stato consegnato al Sig. Mohamud Mohamed Addò come si rileva dal verbale redatto dal Servizio Tecnico Erariale in data 23 Ottobre 1961;

VISTO il disciplinare di concessione edilizia e la planimetria che lo integra;

## DECRETA:

E' concesso a scopo edilizio al Sig. Mohamud Mohamed Addò, l'area di terreno demaniale di mq. 144 sita in Mogadiscio — in Villaggio Anzilotti, di cui all planimetria allegata, ed alle condizioni contemplate nel-

l'unito disciplinare che si approva e si rende esecutivo stipulato in data 20 Agosto 1962 fra il Governo rappresentato dal Ministro delle Finanze e l'interessato Sig. Mohamud Mohamed Addò.

Mogadiscio, li 23 Agosto 1962.

IL MINISTRO
*Abdulcadir Mohamed Aden*

*VISTO e registrato - Reg. n. 2; foglio n. 4.*
*Mogadiscio, li 6 Settembre 1962.*
*Il Magistrato ai Conti:*
Dott. AHMED DHAIR

---

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**Tr. 23 Agoosto 1962, L. 113.**

**Concessione di area di tererno demaniale a favore del Sig. Hussen Giumale**

IL MINISTRO

VISTI gli articoli n. 77 e n. 83, secondo comma della Costituzione;

VISTO il D. A. 18 Maggio 1956, n. 78 di Rep.;

VISTO il D. A. 13 Settembre 1956, n. 99 di Rep.;

RITENUTO che, per effetto dell'Ordinanza n. 5 del 12 Aprile 1950, sono tuttora applicabili, le disposizioni disciplinanti le concessione edilizia contenute nell'Ordinamento Fondiario per l'Eritrea, approvato con R. D. 7 Febbraio 1962, n. 269, esteso alla Somalia con r. d. 17 Marzo 1938, n. 380;

VISTA la domanda in data 5-5-1959, presentata dal Sig. Hussen Giumale Ghedi, intesa ad ottenere in concessione as copo edilizio un appezzamento di terreno demaniale sito in Mogadiscio — nel Quartiere Valle Nord;

CONSIDERATO che l'avviso ad opponendum riguardante l'area di terreno richiesta è rimasto affisso a termini di legge all'albo del Municipio di Mogadiscio, ed è stato pubblicato sul Bollettino Ufficiale della Somalia Suppl. n. 1 al n. 5 in data 10 Maggio 1961, senza opposizione da parte di terzi;

VISTO il progetto concernente la costruzione di una villetta in muratura che è stato approvato a suo tempo della Commissione Edilizia Municipale di Mogadiscio nella sua 271° seduta del 28 Giugno 1961;

VISTA la Bolletta n. 5760 in data 17 Agosto 1961, dell'Ufficio Tasse sugli Affari attestante che il Sig. Hussen Giumale Ghedi, ha pagato la somma di Sh. So. 1.168, quale prezzo di cessione dell'area di terreno richiesta in concessione a scopo edilizia;

CONSIDERATO che l'area di terreno richiesta è di mq. 1168, è stato consegnato al Sig. Hussen Giumale Ghedi come si rileva dal verbale redatto dal Servizio Tecnico Erariale in data 30 Agosto 1961;

VISTO il disciplinare di concessione edilizia e la planimetria che lo integra;

DECRETA:

E' concesso a scopo edilizio al Sig. Hussen Giumale Ghedi l'area di terreno demaniale di mq. 1168, sito in Mogadiscio — nel quartiere Valle Nord, di cui alla planimetria allegata, ed alle condizioni contemplate nell'unito disciplinare che si approva e si rende esecutivo stipulato in data 2 Luglio 1962, fra il Governo rappresentato adl Ministro delle Finanze e l'interessato Sig. Hussen Giumale Ghedi.

Mogadiscio, li 4 Luglio 1962.

IL MINISTRO
*Abdirashid Ali Shermarke*

*VISTO e registrato - Reg. n. 2, foglio n. 26.*
*Mogadiscio, li 20 Settembre 1962.*
*Il Magistrato ai Conti:*
Dott. AHMED DAHIR.

---

**XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

**Tr. 23 Agoosto 1962, L. 114.**

**Concessione di area di terreno demaniale a favore del Sig. Gibril Ali Kassim.**

IL MINISTRO

VISTI gli articoli n. 77 e n. 83, secondo comma della Costituzione;

VISTO il D. L. 7 Febbraio 1965, n. 1, «modificazione alla legge 3 Giugno 1962, n. 14» relativa all'Ordinamento del Governo;

VISTO il D. M. MW-10-2142 del 23-4-1968;
VISTO il D. P. R. 23 Maggio 1961, n. 144;
VISTO l'Ordinanza n. 5 del 12 Aprile 1950;
VISTA la domanda in data 18-7-1966, presentata dal Sig. Gibril Ali Gassim intesa a ottenere in concessione a scopo edilizio un appezzamento

di terreno demaniale sito in Mogadiscio — in Valle Nord — Ricade nella zona VI Periferica Transitoria;

CONSIDERATO che, l'avviso ad opponendum riguardante l'area di terreno richiesta è rimasto affisso a termini di legge all'albo del Municipio di Mogadiscio ed è stato pubblicato sul Bollettino Ufficiale della Somalia n. 4 del 1° Aprile 1963, senza opposizione da parate d iterzi;

VISTO il progetto concernente la costruzione di un edificio in muratura che è stato approvato dalla Commissione Edilizia Municipale di Mogadiscio nella sua 322° seduta del 11 Novembre 1963;

VISTA la Bolletta n. 19562 in data 23 Gennaio 1964, dell'Ufficio Tasse sugli Affari attestante che il Sig. Gibril Ali Kassim ha pagato la somma di Sh. So. 900, quale prezzo di cessione dell'area di terreno richiesta in concessione a scopo edilizio;

CONSIDERATO che l'area di terreno richiesta di mq 900, è stata consegnato al Sig. Gibril Ali Kassim come si rileva dal verbale redatto del Servizio Tecnico Erariale in data 10 Maggio 1964;

VISTO il disciplinare di concessione edilizia e la planimetria che lo integra;

DECRETA:

E' concesso a scopo edilizio al Sig. Gibril Ali Kassim l'arca di terreno demaniale di mq. 900, sito in Mogadiscio — in Valle Nord, di cui alla planimetria allegata e allle condizioni contemplate nell'unito disciplinare che si approva e si rende esecutivo, stipulato in data 15 Maggio 1969 fra il Governo rappresentato dal Ministro dei LL. PP. e l'interessato Sig. Gibril Ali Kassim.

Mogadiscio, li 2 Giugno 1969.

IL SEGRETARIO DI STATO
*On.le Hagi Musse Samantar*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 42.*
*Mogadiscio, li 12 Giugno 1969.*
*Il Magistrato ai Conti:*
MOHAMUD ISSE SALWE

# BOGGA SEDEXAAD

## TALOOYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Caydiid Ismaail Cali, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 12-9-1974ka, uu ku weydiisanaye dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas rektaangolaar ah 27x13,50, kuna fadhiya 364,50 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Jidka 26ka Juun.

Bari waxaa ka xiga: Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 21 Sebtembre 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(211) *Maxamed Cabdi Saciid*

### WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ibmrahim Cabdow Seef, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 8-9-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas rektaangolaar 27x13,50, kuna fadhiya 364,50 mdh.

Soohdin:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Jid.

Koofur Waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed Waxaa ka xiga: Jid.

Bari Waxaa ka xiga: Cibaado Saciid iyo Awees Sheekh Maxamed.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 21 Sebtebre 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(212) *Maxamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maka Xasan Maxamed. u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 8-2-66, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaaq-Shiid, oo leh qiyaas rektaangolaa ah 20x30 kuna fadhiya 600 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga: dhul lamb. 104.
Koofur waxaa ka xiga: dhul lamb. 62.
Galbeed waxaa ka xiga: Jid.
Bari waxaa ka xiga Dhul lamb. 61.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 21 Sebtebre 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(113)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Sheek Isaaq, u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 20-4-72, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas rektaangolar 27x13,50, kuna fadhiya 364,50 mdh.

Soohdin:
Waqooyi waxaa ka xiga Jid.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Jid.
Bari waxa ka xiga: Maxamed Sheekh iyo Faduma Yuusuf.
Muqdisho, 15 Sebtembre 1974.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Nuur Maxamad Cali, u usoo qortay qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 1-9-1973, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Shibis, oo leh qiyaas rerkttangolaar 30x20, kuna fadhila 600 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxa ka xiga: dhul lam. 95.

Koofur waxaa ka xiga: dhul lam. 97.

Galbeed waxaa ka xiga: lam. 73.

Bari waxaa ka xiga: Jidka Balad.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladd

Muqdisho, 15 Sebtembre 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabid Saciid*

*(215)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Warshadda Marmarka, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii, 18-8-1974, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wadajir, oo leh qiyaas rektaangolaar 100x50, kuna fadhiya 5000 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed.

Bari waxaa ka xiga: dhulka Warshadda Marmarka hore loo siiye.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 15 Sebtembre 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(216)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waaxa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Nuur Guutaale, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 28-4-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna Muqdisho xafadda Wardhiigley, oo qiyaas trabeesio 36,20; 30; 22; e 2,10, kuna fadhiya 741,40 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koofur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Maxamed Nuur Guutaale.

Bari waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 15 Sebtembre 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabid Saciid*

*(217)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Faatuma Maxamed Cumar iyo Muxiddin Hilowle maalintii 30-3-66, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Shibis, Jidka Balcad uu iska beddelay cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa trabesiyo addimihiisuna ahaayeen 14; 28; 55; kuna fadhiye 1155 mdh., sababtoo ah in qorshihii degmadaai is beddelay loona sameeyo naqshad cusub oo waafaqaan qorshaha magaalada.

Sidaas aawadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa MWD-279-1161-68, kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa trabesiyo addimihiisu yihiin 45+55x20, kuna fadhiya 1000 mdh. soohdi-

mihiisuna yihiin sida soo socota:
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Dawladdeed.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Jidka Balcad.
Bari waxaa ka xiga: Dhul Dawladdeed.

Muqdisho, 6 Oktoobar 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(218)* *Maxamed Cabdi Saciid*

---

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

---

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Warsame Aadan, u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 23-6-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas rektangolar ah 33x29, kuna fadhiya 957 mdh.
Waqooyi waxaa ka xiga: dhul lamb. 3.
Koofur waxaa ka xiga: Cali Cabdalla.
Galbeed waxaa ka xiga: Jid.
Bari waxaa ka xiga: dhu lamb. 10 iyo 12.
Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 6 Oktoobar 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(219)* *Maxamed Cabdi Saciid*

---

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

---

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Ciise Faarax, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dulka Maalintii 17-9-74ka, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hodan, oo leh qiyaas rektangolar ah 23x22, kuna fadhiya 506 mdh.
Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb. 2.

Koofur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 5.

Bari waxaa ka xiga: Bashir Yarroow.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 6 Oktoobar 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
'220) *Maxamed Cabdi Saciid*

---

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

---

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Jaamac Muuse Samatar, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka maalintii 18-10-1973kii, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Hawl Wadaag, oo leh qiyaas rakangolar 16,50x13,50, kuna fadhiya 222,75 mdh.
Soohdin:

Waqooyi waxa ka xiga: Jid. yar.

Koofur waxaa ka xiga: Jid. yar.

Galbeed waxaa ka xiga: Jid.

Bari waxaa ka xiga: Jid. yar. t

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 6 Oktoobar 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
(221) *Maxamed Cabdi Saciid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Inj. Cabdisalaam Xaaji Saxardiid, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 9-9-74, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardhiigley, oo leh qiyaas trabesiyo 35,5; 34,8; 20,40, kuna fadhiya 307,98 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Beerta Wardhiigley.

Koofur waxaa ka xiga: Dugsiga 15 Maajo.

Galbeed waxaa ka xiga: Dhulka Dawladda Hoose.

Bari waxaa ka xiga: Jidka Maxamuud Xarbi.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 6 Oktoobar 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamud Cabdi Saciid*

*(222)*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## *N A A D A  D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Muunye Aadan Jaamac, u usoo qortay arji qaybata Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 26-8-68, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Xamar-Weyne, oo leh qiyaas rektangolaar 10x30, kuna fadhiya 300 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jidka Ejito.

Koofur waxaa ka xiga: Bakhaarka xafiiska qaranka.

Galbeed waxaa ka xiga: Jid.

Bari waxaa ka xiga: Dhulkii hore loo siiye jaallahaan.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 6 Oktoobar 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamud Cabdi Saciid*

*(223)*

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeeynayaa in Jaalle Cumar Xaaji Maxamed Bood, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka Maalintii 29-12-73, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wadajir, oo leh qiyaas rektangolaar 30x47, kuna fadhila 1417 mdh.

Soohdin:

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul uu leeyahay Shikoti.

Koofur waxaa ka xiga: dhul uu leelahay Cumar Xaaji M. Bood.

Galbeed waxaa ka xiga: Jid.

Bari waxaa ka xiga: Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqashadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga doodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 6 Oktoobar 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(224)*

---

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

### *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Cali Suubiye, Maalintii 28-11-65, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Yaaq Shiid, Jidka Balcad uu iska beddelaaday cabbirkii hore oo qaabkiisu ahaa rektangolaar addimihiisuna ahaayeen 34x17, kuna fadhiye 578 mdh., sababtoo ah in la beddelay qorshihii degmadaas looma nameeye qorshe cusub.

Sidaas aawaadeed naadadii hore oo lagu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa BF-726-2041-67 ee 2-7-67, kana baxday xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin-karo jaallahaas qaabkiisu waa rektangolaar addimihiisu yihiin 30x20, kuna fadhila 600 mdh., soohdimihiisuna yihiin sida soo socota:

Waqooyi waxaaa ka xiga: Dhul lamb. 103.

Koofur waxaa ka xiga: Beer cagaarey (Jerdino).

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 63.

Bari waxaa ka xiga: Jidka Balcad.

Muqdisho, 6 Oktoobar 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(225)*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Cabdulaahi Diini, maalintii 2-7-68 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada C. latte, qaabkiisuna ahaa rektangolaar addimihiisuna ahaayeen 60x50 kuna fadhiye 3000 mdh., looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada, Jidka 21ka Oktoobar sidaas aawdeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa MWD-1411-68 ee 15-6-68 oo ka baxday xafiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada, Jidka 21ka Oktoobar qaabkiisuna waa rektangolaar addimihiisu yihiin 30x20, kuna fadhiya 600 mdh., soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxa ka xiga: Dhul lambarkiisu yahay 252.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 257.
Bari waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 259.

Muqdisho, 6 Oktobar 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(226)* *Maxamed Cabdi Saciid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## *N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Cabduraxmaan Diini, maalintii 2-6-68, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada C. latte qaabkiisuna ahaa raktangolar addimihiisuna ahaayeen 60x50 kuna fadhiye 3000 mdh., looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada, Jidka 21ka Oktoobar sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa MWD-806-141-68 ee 15 Jul. 1968, oo ka baxday xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada, Jidka 21ka Oktoobar qaabkiisuna waa rektan-

golaar addimihiisu yihiin 30x20 kuna fadhiya 600 mdh., soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul lamb. 253.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 258.
Bari waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 260.

Muqdisho, 6 Oktoobar 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(227)* *Maxamed Cabdi Saciid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Caasha Aadan Cali, maalintii 28-10-65, loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan qaabkiisuna ahaa rektangolaar addimihiisuna haayeen 36,60x20, kuna fadhiye 723 mdh., looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada, Jidka 21ka Oktoobar qaabkiisuna waa rektangolaar addimihiisu yihiin 40x30, kuna fadhiya 1200 mdh., soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.
Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 35.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 31.
Bari waxaa ka xiga: Dhul lamb. 33.

Muqdisho, 6 Oktobar 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*(228)* *Maxamed Cabdi Saciid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*N A A D A   D H U L*

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Abshir Warsame Xasan iyo Cali Cabdulqaadir, maalintii 24-4-66 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada C. Bottego, qaabkiisuna ahaa trapeziodale addimihiisuna ahaayeen 70; 45; 40, kuna fadhiye 2.300 mdh., looga

qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada, Jidka 21ka Oktoobar sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa BF-368-126-67 ee 12-2-67, oo ka baxday xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada, Jidka 21ka Oktoobar, qaabkiisuna waa rektangolaar addimihiisu yihiin 40x30, kuna fadhila 1200 mdh., soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.
Koofur waxaa ka xiga: Jid.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 198.
Bari waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 196.

Muqdisho, 6 Oktoobar 1974.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka
*Maxamed Cabdi Saciid*

*(229)*

---

## MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE

---

### GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBILKA J. HOOSE MARKU AKHRIYEY DACWADDAN

MARKUU ARKAY waxay ku saabsan tahay shaqada xafiiskan.

MARKAAN ARKAY qodobka 69 D. L. 9-9-1965 N. 2;

Waxaan caddeynayaa lumida Buugga L. 1731 ka soo baxay Bankiga Ganacsiga Soomaaliyeed Laanta Kismaayo kuna qoran lacag dhan 6.005, (Lix kun iyo shan).

Waxaan amray in loo cusbooneysiiyo Shire Muuse Maxamed Muddo 15 beri ah gudaheed laga bilaabo markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah, haddaan la helin qof kale oo buugga sheegta. Waxaa kaloo la caddeynayaa in buugga gacanta laga saaro ninka kor ku qoran ama qof kale oo ka sita wakaalad aan shaki ku jirin.

Kismaayo, 26-9-1974.

Guddoomiyaha
Maxkamadda Gobolka J. Hoose
*Dr. Xuseen Faarax Hilawle*

(229 Bis)